SAN DIEGO CITY SCHOOLS

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

Phone: (619) 725-5578
Fax: (619) 725-5576

Waaxda Isgaadhsiinta

Su'aalaha ay Ardeyda Dugsiyada Hoose inta badan soo jeediyaan ee ku saabsan Eriska iyo Caydhinta

Marka dugsiga la iga eryo muxuu dugsigu igu caawin karaa si aan casharaddii la qaatey ula qabsado?
Waalid kasta oo ilmihiisa dugsiga laga eryo wuxuu codsan karaa in la soo siiyo shaqada fasalka lagu qabanayo iyo imtixaanada inta uu eriska ku maqan yahay. Macallinku wuxuu ardeyga uga baahan yahay inuu soo dhameystiro shaqooyinka la soo siiyo iyo imtixaanadaba muddada uu eriska ku maqan yahay. Ardeydu waxay kaloo la-taliyaha weydiin karaan barnaamijyada ardeyda wax loogu dhigeyo ee dugsiga laga heli karo. Wixii warbixin dheeraad ah, waxaad ka fiirsan kartaa Nidaamka Degmada ee tirsigiisu yahay #6290, oo laga heli karo shabakada Internetka ee SDCS oo ah http://prod031.sandi.net/procedures/pdf/pp6290.pdf.

Maxay ku kala duwan yihiin eriska dugsiga dhexdiisa ah iyo midka ardeygu uu dugsiga bannaanka ka joogeyo?
Eriska dugsiga dhexdiisa ah waxaa weeyaan eriska ardeyga loo qorsheeyo inuu meel gaar ah oo dugsiga ka mid dhexdiisa ah joogo, halkaasna qof shaqaalaha dugsiga ka mid ah ayaa ku kormeeri doona. Eriska ardeyga dugsiga dhexdiisa uu joogeyo diiwaanka joogtada ah ee ardeyga eriskaas lama gelinayo, laakiin faylka guud ayaa raad-raac ahaan loogu keydinayaa, waana eris ardeyga lagu ciqaabeyo inta uu ka gaadheyo heer si rasmi ah dugsiga looga eryeyo. Eriska uu ardeygu dugsiga bannaanka ka joogeyo waa eriska rasmiga ah. Erisku waxaa weeyaan marka ardeygu uusan dugsiga soo geli karin inta uu eriska ku jiro, marka laga reebo shirarka rasmiga ah ee uu dugsiga u imanayo ee eriskaas la xidhiidha.

Waa maxay dembiyada sababeya in ardeyga dugsiga laga caydhiyo ay waajib tahay?
Dhammaan dembiyada ay ka mid yihiin haysashada hubka qarxa, mindiyaha afka leh, walxaha qarxa, faraxumeynta, iyo iibinta waxyaabaha manuuca ah, had iyo jeer waxay keenayaan in lagu taliyo ardeyga waxyaabahaas lagu arko gebi ahaanba dugsiga laga caydhiyo.

Waa maxay Nidaamku waxyaabaha uusan marna u Dulqaadan karin?
Nidaamku waxyaabaha uusan marna u Dulqaadan karin waxaa loogu talagalay ardeyda (dugsiyada dhexe iyo sare), waana dembiyada had iyo jeersababa in ardeyga la eryo ay waajib tahay ama lagu taliyo in gebi ahaanba dugsiga laga caydhiyo. Hase ahaatee, qaar ka mid ah shuruucdaas Nidaamku waxyaabaha uusan marna u Dulqaadan karin ardeyda dugsiyada hoose waa loo adeegsan karaa, sharciga laftiisa arrintaas laguma adeegsaneyo.

Waa maxay waxyaabaha Caydhiska ardeyda lagu Beddelayo ?
Dembiyada khatarta ah ee aan u baahneyn inay waajib yihiin in la isku caydhiyo, maamulaha dugsiga ayaa sameyn doona koox anshaxa qaabilsan oo uu hoggaamineyo si ay u go'aamiyaan in dhexgelis lagu sameeyo inta aysan wax dhicin waxyaabaha loogu beddelo caydhinta ardeyda dugsiyada hoose. Ardeyda sameysa dembiyada qeybtan hoos yimaada waxaa dugsiga laga eryaa muddo shan (5) maalmood ah, kedibna waxaa looga baahan yahay inay ka qeybgalaan barnaamijyo loogu talagalay in akhlaaqdooda lagu hagaajiyo.

Sidee baad u qeexaysaa "weerarka gardarada ah?"
"Weerarka gardarada ah" waxaa lagu qeexaa sida, "isku dayida sharci-darada ah inaad qof kale dhaawac u geysatid". Sharciyada degmada ee anshaxa ku saabsan, qeybta "weerarka gardarada ah" waxaa ka mid ah sababida, isku dayid sababida, ama ku hanjabida inaad qof kale jidhka dhaawac ka gaadhsiisid, iyo si ula-kac ah inaad u xoog sheegatid, una rabshadeysid, marka laga reebo inaad lafahaaga difaacaysid.

Sidee baad u qeexaysaa "diidmada cad ama madax-adayga?"
Diidmada cad waxaa lagu qeexaa sida "marka aad amarka masuulka sharciga ah ee shaqaalaha dugsiga aad diidid," kuwaas waxaa ka mid ah horjoogeyaasha, macallimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo shaqaalaha kale ee dugsiga ee hawshooda gudaneya. Taas waxaa ka mid noqon karta marka aad si u-kas ah uga hortimaadid macallinka ama sharciyada fasalka aadan u hoggaansamin. Madax-adaygu in dugsiga lagaa eryo ayuu keeni karaa.

Maxaan sameyn karaa haddii aan u arko in qof shaqaalaha dugsiga ka mid ah uu si khaldan iila dhaqmay?
Cabashada ku saabsan shaqaalaha waa in maamulaha loo gudbiyaa. Haddii cabashadaas heer dugsi lagu xalin waayo, waxaad cabasho rasmi ah u gudbin kartaa adiga oo waca Waaxda Waalidiinta Kaalmeysa iyo Adeegyada Guddiga oo telefoonkeedu yahay (619) 725-5525 ama tega Qolka 2153 ee Eugene Brucker Education Center oo ku yaal 4100 Normal Street, San Diego, CA 92103. Waxaad kaloo waxyaabo badan ka ogaan kartaa adiga oo booqda shabakada Internetka ee waxbarashadda degmada oo ah: http://www.sandi.net/parents/support/support.html.

(Wey socotaa)

Maxaan sameyn karaa haddii aan u arko in si khalad ah dugsiga la iiga eryey?
Haddii ardeygu uu u arko in si khalad ah dugsiga looga eryey, waa inuu eriskaas oggolaadaa kuna maqnaadaa, laakiin eriskaas abiil ayuu ka qaadan karaa, haddii uu abiilkaas loo oggolaado, eriskaas diiwaanka ardeyga waa laga saareyaa. Liiska Abiilka Eriska waxaad ka heli kartaa adiga oo waca Xafiiska Meeleynta iyo Abiilka oo telefoonkiisu yahay (619) 725-5660, ama waxaad kala soo bixi kartaa shabakada Internetka degmada oo ah: http://www.sandi.net/depts/placement_appeal/suspension_appeal.pdf.

Haddii dugsiga la iga eryo, ma ku soo laaban karaa? Maxaase dhacaya haddaan ku soo laabto?
Wakhtiga eriska uu ardeygu dugsiga bannaanka ka joogeyo waa eriska rasmiga ah. Erisku waxaa weeyaan marka ardeygu uusan dugsiga soo geli karin inta uu eriska ku jiro, marka laga reebo shirarka rasmiga ah ee uu dugsiga u imanayo ee eriskaas la xidhiidha. Haddii uu ardeygu dugsiga ku soo laabto, dugsigu wuxuu ugu yeedhayaa Booliiska Dugsiga iyo waaalidka ilmaha si ardeyga dugsiga looga saaro.

Macallimiintu ma ku khasbi karaan waalidiinta inay dugsiga u yimaadaan shir ku saabsan eriska?
Waxaa waalidiinta aad iyo aad loogu adkaynayaa inay dugsiga yimaadaan si ay ilmahooda u fiiriyaan sida uu dugsiga ku yahay ama shir ay u yimaadaan, laakiin ma jirto waalidiinta cid ku khasbi karta inay yimaadaan. Ardeyga dugsiga looma diidi karo inuu ku soo laabto marka uu eriska soo dhammeysto amase looma ciqaabi karo sababo la xidhiidha waalidkii oo dugsiga iman waayey darteed.

Waa maxay habka eriska abiilka looga qaato?
Si aad eriska abiil uga qaadatid, waa in waalidka ama qofka ilmaha ka masuulka ah uu buuxiyaa Foomka Abiilka Eriska. Foomkaas oo si dhammeystiran loo buuxiyey waa in loogu gudbiyaa Xafiiska Meeleynta iyo Abiilka muddo shan iyo toban casho (15) oo maalmaha dugsiga la dhigto ah, lagana soo bilaabo maalinta koowaad ee ardeyga la eryey. Xafiiska Meeleynta iyo Abiilka waxaad kala xidhiidh kartaa telefoonkan ah (619) 725-5660 si aad uga codsatid inay foom boostada kuugu soo diraan, ama waxaad kala soo bixi kartaa shabakada Internetka degmada oo ah: http://www.sandi.net/depts/placement_appeal/suspension_appeal.pdf.

Waa maxay habka caydhiska abiilka looga qaato?
Marxalada caydhiska, kedib marka Guddiga Waxbarashaddu ay tallaabo qaadaan, ardeygana dugsiga ka caydhiyaan ayaa Xafiiska Meeleynta iyo Abiilku wuxuu waalidka ama qofka ilmaha ka masuulka ah siin doonaa warbixinada ku saabsan meelaha lagala soo xidhiidheyo Xafiiska Waxbarashadda ee Gobolka San Diego, kaas oo maamula abiilka caydhiska ardeyda. Waalidku wuxuu haystaa 30 maalmood si uu abiil u soo gudbiyo, waxayna ka bilaabmeysaa maalinta Guddigu go'aanka caydhiska ardeyga uu gaadhey. Go'aanka Guddiga waxbarashadda ee uu dib ugu dhigay caydhiska wax saameyn ah kuma laha wakhtiga iyo shuruudaha loo baahan yahay si abiilka loo xareeyo. Xafiiska Waxbarashadda Gobolka waxaa lagala xidhiidhi karaa telefoonkan ah (858) 292-3500, wuxuuna ku yaalaa 6401 Linda Vista Rd., San Diego, CA 92111. Shabakada Internetka waxaa laga heli karaa Buugga Tilmaan-bixiyaha ee Abiilka Caydhiska: http://www.sdcoe.k12.ca.us/expulsion/expulsion1.html.

Sidee baan dugsiga ugu soo laaban karaa caydhiska kedib?
Marka dugsiga lagaa caydhiyo, Guddiga Waxbarashaddu wuxuu ardeyga ku meeleyn karaa dugsi, fasal ama barnaamij, sida uu sharcigu dhigeyo ee inay habboon tahay loo arko. Guddigu wuxuu ardeyga u dejineyaa qorshe lagu baxnaanineyo. Qorshaha baxnaanintaas waxa ka mid ah in wakhtiyo gaar ah arrimaha ardeyga dib loo fiiriyo iyo in lala taliyo. Mar haddii qorshaha gaarka ah ee ardeyga lagu baxnaanineyo la dhammeeyo, Xafiiska Meeleynta iyo Abiilka ee degmada ayaa go'aan ka gaadheya inay ardeyga ku meeleynaya halka ugu habboon si ardeyga mar kale dugsiga loogu oggolaado. Haddii qorshaha gaarka ah ee ardeyga lagu baxnaanineyo aan la dhammeyn, Guddiga Waxbarashaddu waxay ardeyga u diidi karaan in lagu qoro barnaamijka dugsiyada caadiga ah, waxayna ardeyga ku qoreyaan dugsiga jaaliyada dhallinyarada asluubtooda lagu toosineyo ilaa qorshaha loogu talagalay ardeygu uu dhammeystiro, kedibna ardeyga dib dugsiga caadiga ah loogu oggolaado.

Caydhisku waa muddo intee le'eg ayuu ku eg yahay?
Waxay ku xidhan tahay nooca dembigu yahay, go'aanka caydhisku hal sanno kama badnaan karo kaas oo laga bilaabeyo taariikhda ardeyga la caydhiyey. Taas macnaheedu maaha taariikhda dembigu uu dhacay, wey ka horreyn kartaa. Ardeyda waa dugsiga dib loogu soo celineyaa bilowga xilli dugsiyeedka cusub oo keliya.

Waa maxay marxaladaha ay degmadu ku eryi ama caydhin karto ardeyga curyaanka ah, marka uu ku jiro IEP?
Dhammaan ardeyda arrimaha lagu eryeyo ama lagu talineyo in lagu caydhiyo waa isku mid, xaataa hadday xaq u leeyihiin adeegyada Sharciga Baxnaaninta ee 504 ama Waxbarashadda Khaaska ah. Hase ahaatee, ardeygu xaataa haddii uu ka diiwaangashan yahay Waxbarashadda Khaaska ah oo uu keensado sababihii lagu caydhin lahaa ama lagu eryi lahaa 10 maalmood in ka badan, sharcigu wuxuu dhigeyaa inuu sii wato Waxbarashadda Guud ee ku Habboon Lacag la'aanta ah. Ardeyga Waxbarashadda Khaaska ah ku jira wuu ka duwan yahay ardeyga waxbarashadda caadiga ah ku jira. Sidaas darteed, adeegyada lagu kaalmeynayo lagama joojineyo, laakiin waxaa laga yaabaa in lagu meeleyo meel kale oo uu ka heli doono adeegyada Qorshaha Waxbarashadda Shakhsiyeed (IEP) ee ardeyda. Waxaad barataa Qoddobka 504 adiga oo booqaneya shabakada Internetka ee ah: http://www.hhs.gov/ocr/504.html. Warbixino dheeraad ah oo ku saabsan Sharciga Waxbarashadda Guud ee ku Habboon ee Lacag la'aanta ah waxaad ka heli kartaa Internetka : http://www.ed.gov/about/offices/list/ocr/docs/edlite-FAPE504.html.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay Ururka Annie E. Casey Foundation